

Suurat Al-Infidhaar

سُورَةُ الْاِنْفِطَارِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Markay Samadu dildillaacdo.
2. Xiddiguhuna daataan.
3. Badahana laysku furo.
4. Xabaalahana la soo bixiyo (Dadkii).
5. Waxay ogaan nafu waxay hor marsatay iyo waxay dibmarisay.
6. Dadow maxaa kugu kadiyay Ee-bahaaga sharafta leh.
7. Ee kii ku abuuray ah kuna ekeeyay kuna simay.
8. Siduu doonana kuu sameeyey.
9. Saas ma aha ee waxaad beeni-naysaan abaal marinta.
10. Malaa'ig baana idin ilaalinaysa.
11. Oo sharaf leh waxna qori.
12. Ogn waxaad falaysaan.
13. Kuwa wanaagsani waxay gali Na-ciima.
14. Kuwa xun Xunna waxay gali Ja-xiimo.
15. Wayna ku guban Maalinta abaal-marinta.
16. Kamana maqnaadaan Naarta.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

- 1 إِذَا السَّمَاءُ انْفَطَرَتْ
- 2 وَإِذَا الْكَوَاكِبُ انْتَثَرَتْ
- 3 وَإِذَا الْبِحَارُ فُجِرَتْ
- 4 وَإِذَا الْقُبُورُ بُعِثَتْ
- 5 عَلِمَتْ نَفْسٌ مَّا قَدَّمَتْ وَأَخَّرَتْ
- 6 يَأْتِيهَا الْإِنْسَانُ مَاعْرَكَ رَبِّكَ أَلْكُرِّمِ
- 7 الَّذِي خَلَقَكَ فَسَوِّكَ فَعَدَلَكَ
- 8 فِي أَيِّ صُورَةٍ مَّا شَاءَ رَكَّبَكَ
- 9 كَلَّا بَلْ تُكَذِّبُونَ بِالَّذِينَ
- 10 وَإِنَّ عَلَيْكُمْ لَحَافِظِينَ
- 11 كِرَامًا كَنِينِينَ
- 12 يَعْلَمُونَ مَاتَفْعَلُونَ
- 13 إِنَّ الْأَبْرَارَ لَفِي نَعِيمٍ
- 14 وَإِنَّ الْفُجَّارَ لَفِي جَحِيمٍ
- 15 يَصَلُّونَهَا يَوْمَ الَّذِينَ
- 16 وَمَاهُمْ عَنْهَا بِعَائِينَ

17. Maalinta abaalmarinta ma taqaannaa.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا يَوْمَ الدِّينِ ﴿١٧﴾

18. Haddana ma taqaannaa Maalinta abaalmarinta.

تَمَّ مَا أَدْرَاكَ مَا يَوْمَ الدِّينِ ﴿١٨﴾

19. Waa Maalinta ayna u hanannin Nafna Naf kale waxba, Amarkana Maalintaas waxaa iska leh Eebe.

يَوْمَ لَا تَمْلِكُ نَفْسٌ لِنَفْسٍ سِتًّا
وَالْأَمْرُ يَوْمَئِذٍ لِلَّهِ ﴿١٩﴾

Marka Qiyaamadu dhici waxaa iman doorsoon iyo is baddallo badan, Ruux walbana wuxuu ogaan dhabta, saa daraadeed mar haddii Eebe Dadka kulmin, abuurkoodiina wanaajiyay, Caqlina siiyay, Malaa'igna u soo diray og wuxuu fali, Jidkuna Laba yahay, Jannii Naar, Ruuxna Ruux kale wax u taraynin idan Eebe la'aantiis, amarkana dhammaan Eebe iska leeyahay miyayna habboonayn Eebe aqoonsi, wanaag falid, Xumaan ka tagid iyo u darbasho Maalintaas.

Cadullaahi Ibnu Cumar wuxuu ka wariyay Nabiga: «Ruuxii ku farxi inuu Qiyaamaha dhab u arko ha akhriyo (Marka Qorraxda la duubo), (Marka Samadu dillillacdo) iyo (marka Samadu jeejjeexanto). Al-Infidhaar (1-19).

Suurat Al-Mudhaffiifin

سُورَةُ الْمُطَفِّفِينَ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

1. Wuxuu Halaag u sugnaaday kuwa xaqa nusqaamiya.

وَبِئْسَ لِلْمُطَفِّفِينَ ﴿١﴾

2. Waa kuwa markay miisina oofsada (dhammaystirta).

الَّذِينَ إِذَا كَالُوا عَلَى النَّاسِ يَسْتَوْفُونَ ﴿٢﴾

3. Markay u miisi ama u miisaamina ka nusqaamiya.

وَإِذَا كَالُوا لَهُمْ أَوْ وَزَنُوا لَهُمْ يُخْسِرُونَ ﴿٣﴾

4. Miyayna u malaynaynin kuwaasi in loo soo bixin.

أَلَا يَظُنُّ أُولَئِكَ أَنَّهُمْ مَبْعُوثُونَ ﴿٤﴾

5. Maalin wayn darteed (Qiyaamada).

لِيَوْمٍ عَظِيمٍ ﴿٥﴾

6. Maalinta Dadku u istaagi Eebaha Caalamka.

يَوْمَ يَقُومُ النَّاسُ لِرَبِّ الْعَالَمِينَ ﴿٦﴾

7. Saas ma aha ee Camalka kuwa xun wuxuu ku Qoranyahay Sijiin.

كَلَّا إِنَّ كِتَابَ الْفُجَارِ لَفِي سِجِّينٍ ﴿٧﴾

8. Ma taqaannaa Sijiin.

وَمَا أَدْرَاكَ مَا سِجِّينٌ ﴿٨﴾